

UNITED NATIONS



NATIONS UNIES

Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia

WAR-SAXAAFADEED

Xafiiska Xarunta Qaramada Midoobay & Isku-duwaha Hawlaha Bini'aadminnimada Soomaaliya

Labo shaqaalaha QM oo lagu dilay weerarkii Xarunta UNDP Hargeysa

(Nairobi, 30 October 2008) Waxay ahayd arrin murugo lixaad leh xambaarsan, kaddib markii uu Isku-duwaha Xarunta hawlgalaha Bini'aadminnimada ee Soomaaliya Mark Bowden uu xaqiijiyey in xubno ka mid ahaa Shaqaalaha UNDP ay ku geeriyooden weerararkii 29kii October 2008 lagu qaaday xarunta UNDP Hargeysa.

Marxuum Mohammed Geele, wuxuu ahaa la-taliyaha arrimaha ammaanka ee maxalliga ah oo u shaqaynayey QM muddo shan sano ah. Wuxuuna ifka kaga tagay xaas iyo shan carruur ah oo uu dhalay. Marxuum Sayid Hashi, oo ka soo jeeda Borama, Somaliland, wuxuu ahaa darawal u shaqayn jiray mashruuca adeegyada Xafiiska QM ilaa 1997, isna wuxuu ifka kaga tagay xaas iyo seddex wiil. "waxaan tacsii naxdin leh u gudbinaynaa qoysaskii iyo asxaabtii ay ka geeriyooden labad xubnood ee qaraxaas ku dhintay," ayuu yidhi Mr. Bowden. "Laga bilaabo imminka, waxaan si deg-deg ah ugu hawlgalaynaa daryeelka iyo taageerada nololsha qoysaskii dhibanayaashaas iyo xubnihii kale ee shaqaalaha ahaa ee weerarkan murugada leh ka badbaaday. Weerarakaas xad-gudubka dheeraadka iyo bartilmaamadesiga ahaa, wuxuu dhibaatooyin laxaw iyo walaac leh ku abuuray dad fara badan oo asxaabtoofdo ay ku waxyeeloobeen oo ka mid ahaa asxaabtii xubnaha ay waxyeeladu la soo gudboonaatay."

Intaas waxaa soo raaca lix xubnood oo kale oo shaqaalaha ka mid ahaa oo dhaawacyo soo gaadheen, labo ka mid ah oo ay dhawacyadoodu culus yihiin, ayaa loo qaaday dalka Djibouti, si halkaas loogu soo daweyo. Hadda xaaladdooda caafimaad way ka soo raynaysaa. Waxayna QM imminka ka soo daad-guraynaysaa Hargaysa shaqaalaha kale ee u baahan daaweyn caafimaad iyo daryeel dheeraad ah, kuwa u muhiim ah ee hawlan badbaadinta nololsha bulshada, waxay sii joogi doonaan Hargeysa, iyadoo la xaddidi doono dhaqdhaqaaqyadooda.

Waxaa kaloo iyaguna xafiisyo ku leh Xarunta UNDP hay'adaha kala ah; xafiiska Isku-duwidda Arrimaha Bini'aadminnimada (OCHA), Mashruuca Adeegada Xafiiska Qaramada Midoobay (UNOPS), Xafiiska Siyaasadda qaramada Midoobay ee Somalia (UNPOS), Xafiiska UN AIDS-ka iyo Xafiiska Isku-duwaha hawlaha gargaarka. Sidoo kale qarixii 29kii Oktoober, wuxuu ku soo beegmay iyadoo goobo kala duwan oo magaalada Hargaysa ah ay ku sugnaayeen 74 caalami ah, iyo ilaa 200 heer qaran ah oo u shaqeeya Qaramada Midoobay.

Waxaana xaruntaas ku dhex yaallay afar dhisme. Saqafkii sare ee dhawr qol ee dhisme hal dabaq ka koobnaa ayaa dumay. , iyadoo khasaare lixaad lehna uu soo gaadhay dhisme labo dabaq ka koban, kaasoo ku qgubtay qarixii halkaas ka dhacay. Koox gurmada ah ayaa shalay gaadhay magaalada Hargaysa, si ay daraasad ugu soo sameeyaan khasaaraha iyo tallaabooyinka xiga.

"Maadaama ay Soomaaliya ka mid ah tahay goobaha ugu khatarta badan ee shaqaalaha gargaarku ay dunida guudkeeda kala kulmaan, Hargeysa waxay aheyd goob xasiloon, sidaas awgeedna ay si joogto ah ay shaqaalaha Qaramada Midoobay ay halkaas ug sugnaayeen," Sidaas waxaa sheegay Mr.

Bowden. “Maxaa yeelay, waxay ahayd meel xasiloon oo QM uu suuragalinaysa inay sii wadaan geeddi-socodka dib-u-dhiska, dhismaha Dugsiyada Waxbarashada, qodista ceelasha, iyo dhismaha xoojinta nabadda laga soo bilaabo 1998.” Hay’adaha Qaramada Midoobay, ayaa waxay ka hawlgalaan Hargeysa iyo gobollada waqooyi-galbeed, iyadoo gacan ka siiya dawladaha hoose iyo qaybaha bulshada adeegyada ay u baahan yihiin sida; biyaha iyo dartyeelka caafimaadka ee ku wejahan dadkii dagaallada ku bara-kacay ee aan weli dib ugu soo laaban nolosha caadiga ah. Waxay kaloo hay’adaha Qm, gacan ka gaystaan taageerada dhismaha maaraynta maaliyadda iyo qaybaha kale ee maamul-wanaagga hay’adaa maamulka heer-gobol,sida; Booliiska, Sharciga iyo kala dambaynta, maaraynta maaliyadda dawladda, sidoo kale waxay hay’adaha QM taageero u fidiyaan gurmada abaaraha, labadaraadle, sidii loo kobcin lahaa adeegyada daryeelka dadka xoolo-dhaqatada ah iyo hantida kale ee ma-guurtada ah.

Sannadkan 2008, siddeed qof oo u shaqayn jiray Qaramada Midoobay iyo 24 qof oo iyaguna u shaqayn jiray hay’adaha aan dawliga ahayd(NGOs) ee dhinaca gargaarka, ayaa lagu dilay dalka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinkan iyaga ah, ayaa dhammaantood waxay ka dheceen Batamaha iyo Koofurta dalka Soomaaliya

Wixii faahfaahin dheeraad aoo dhinaca xogata la xidhiida waa Dawn Elizabeth Blalock, Public Information Officer +254-734-210-102 or blalock@un.org ama ee Somaali, kala soo xiriir Mona Mohamed + 733643737 mohamed26@un.org